

Qoraalkani waxa u sharaxayaa sida macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan loo isticmaali karo shaacana looga qaadi karo, iyo sida gallaangal loogu yeelan karo macluumaadkan. Fadlan dib u eeg si taxadir leh.

Qoraalkani waxa uu saamayn leeyahay Sebteembar 23, 2013.

Ilaalinta sirta macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga waa noo muhiim, oo masuuliyadana waxa aanu u qaadanaa si halis ah. Anaga, ADAMH, waanu fahamsanahay in macluumaadka adiga iyo caafimaadka ku saabsan ay yihiin shaqsi, waxana adiga kuu muhiim ah inaan u ilaalino si qarsoon. Waxa naga go'an inaan ku ilaalino si qaab qarsoon ee ku aaddan macluumaadka ku saabsan xaaladda caafimaad hore, wakhti xaadirkaagan, ama xaalada caafimaad eemustaqbalka, daaweynta, ama bixinta.

WAAJIBAADKA ADAMH SI UU U ILAALIYO MACLUUMAADKA CAAFIMAADKAAGA

Waxa uu sharcigu nooga baahan yahay inaan:

- Ilaalino sirta macluumaadka caafimaadkaaga.
- Ku siino qoraalkan ah waajibaadkayaga sharci iyo hawlahayaga sirta ah.
- Raacno hawlaha lagu sharaxay qoraalkan.

Qoraalkani waxa uu shaxarayaa hababka aanu isticmaali karno iyo shaac ka qaadida macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga siloo wado daaweynta, bixinta, hawlaha qorshaynta caafimaad iyo ujeedooyin kale ee laga oggol yahay ama looga baahan yahay sharciga. Sidoo kale waxa uu sharaxayaa xuquuqahaaga iyo waajibaadkayaga iyadoo la tixgalinayo diiwaanadayada ama macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga.

SIDA AANU U ISTICMAALI KARNO & SHAACANA UGA QAADI KARNO WAX KU SAABSAN CAAFIMAADKAAGA & XADDIDAADA ISTICMAALKA OGGOLANSHIYAHAAGA LA'AANTII

Fadlan ogsoonow in haddii aad heshay adeegyo daaweyn oo ku saabsan arrimaha alkahoolka ama daroogo kale (AOD) ama caafimaadka maskaxda (MH), waxa lagu weydiistay inaad saxeeexo oggolaanshiyo markii aad joogtay xafiiska bixiyahaaga sidaa daraadeed waanu wadi karnaa bixinta adeegyadaada.

Waanu isticmaalnaa una shaacinaa macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga dhawr sababood daraadood. Waxa aanu leenahay xuquuq xaddidan oo aanu ku isticmaalno ama shaaca kaga qaadno macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga ee daaweynta, bixinta, ama hawlgalka qorshaha caafimaadkayaga. Isticmaalada intaa ka baxsan, waa inaanu haysanaa oggolaanshiyo qoran ilamaa sharcigu uu noo oggolaado inaan isticmaalno ama shaaca ka qaadno iyada bilaa oggolaanshiyo. Marka laga reebo sababo qeexan, waa inaan isticmaalnaa ama shaaca ka qaadnaa kaliya macluumaadka caafimaadka kan ugu yar ee lagama maarmaanka ah sidoo hirgaliyo ujeedooyinka la qorsheeyay.

Qaybahan soo socdaa waxa ay sharaxayaan hababka kala duwan ee aanu u isticmaali karno shaacana uga qaadi karno macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga. Qayb kasta, waxa aanu ku sharixi doonaa waxa aynu uga jeedno waxaanu isku dayi doonaa inaan bixino waxoogaa tusaalayaal ah. Qayb kasta oo isticmaal ama shaac ka qaadid lama liistayn karo; si kastaba ha ahaatee dhammaan hababka lanoo oggolaaday inaan isticmaalno iyo shaac ka qaadida macluumaadku waxa ay ku dhacayaan mid kamid ah.

Daaweynta: Marka ADAMH aysan bixinayn daaweyn caafimaad oo toos ah, waxa aanu isticmaali karnaa ama shaaca uga qaadi karnaa macluumaadka caafimaad bixiyayaasha adeegga, kaasi oo aanu hadda leenahay heshiis ah adeegyada bukaanka, si loo xidhiidhiyo daryeelka caafimaadkaaga. Haddii aanu shaaca ka qaadno macluumaadka MH, waxa kujira waxaan ka badnayn daaweyntaada iyo xaaladda caafimaadkaaga jidheed iyo taariikhda; guudmarka daaweyntaada iyo baahiyaha daaweynta; sii daynta guudmarka; iyo xaaladda maaliyadeed. Kaliya ah waxa aanu shaaca ka qaadi karnaa macluumaadka AOD shaqaale caafimaad xaaladda dhabka ah ee gar-gaarka deg degga ah.

Bixinta: ADAMH waxa ay u isticmaashaa ama shaaca uga qaadaa macluumaadka caafimaad wakaaladaha dawladda iyo guddiyo kale oo ah ADAMH si ay go'aan uga gaadhaan xaq u lahaanshahaaga adeegyada si furan loo lacageeyo sidaa daraadeed waxa aynu maareyn karnaa xaq ulahaanshaha, qorista, biil garaynta, iyo bixinta adeegyada daryeelkaaga caafimaad. Si kastaba ha ahaatee, intii kahoraysay isticmaalkayaga ama shaacintayada macluumaadka AOD ee ujeedooyin bixineed, bixiyaha adeegaaga waxa looga baahday inuu haysto oggolaanshiyaahaaga si aad u fasaxdo macluumaadka caafimaadkaaga. Intii kahoraysay isticmaalkayaga ama shaacinta macluumaadka MH, bixiyaha adeegaaga waxa uu isku dayay inuu helo oggolaanshiyaahaaga shaacinta si aad bixin ugu hesho alaabaha iyo adeegyada. ADAMH waxa ka mamnuuc ah isticmaalka ama shaacinta ujeedooyinka taageero ee xidhiidhku ka dhaxeeyo.

Hawlgalka Qorshaha Caafimaad: ADAMH waxa ay u isticmaashaa ama shaaca uga qaadaa macluumaadkaaga caafimaad hawlahayaga ganacsi. Tusaale ahaan, waxa aanu qiimaynay tayada adeegyada ee adiga ku siiyaan bixiyayaashayada adeeggu. Waxa aanu shaaca ka qaadnay macluumaad xisaabiyahayaga ama qareenkayaga ujeedooyin baadhitaan awgeed. Qiimayntayadii MH ama AOD iyo xogahayagii baadhista, kumaanu darin ama kumaanu haynin magacyada shakhsiyaadka macaamiisha daryeelka caafimaad, ama maanu shaacin aqoonsigooda sinaba. Waxa aanu la wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka bixiyayaashayada adeegga heshiisyadayada si aan u xalino cabashadaada, cadhada, ama arrimaha adeegga macaamiisha. Haddii aanu shaacino macluumaadka MH, waxa kujira wax aan ka badnayn daaweyntaada, xaaladda caafimaad iyo taariikhda; guudmar ah daaweyntaada iyo baahiyaha daaweyntaada; sii daynta guudmarka; iyo xaaladda maaliyadeed, iskuday ayaan samayn doonaa siloo helo oggolaanshiyaahaaga shaac qaadid. Waxa aanu soo gudbin doonaa hawlo khalad ah sida lagu sharaxay halka hoose.

GUDDIGA ADAMH EE DEGMADA FRANKLIN OGEYSIISKA HABDHAQANKA ASTURNAANTA

Sharcigu waxa uu bixinayaa in aynu isticmaali karno ama shaaca ka qaadi karno macluumaad ku saabsan caafimaadkaaga iyadoon la haysan ansixintaada ama oggolaanshiyahaaga xaaladahan soo socda daraadood:

Meel Marinta Sharciga & Dawladda: ADAMH waxa ay isticmaali kartaa ama shaaca ka qaadi kartaa macluumaadka caafimaad ee la xidhiidha dembiile lagu tuhumiya hawl danbi oo halis ah iyadoo laga jawaabayo amar maxkamadeed. Waxa aanu shaaca ka qaadi karnaa macluumaadka MH ee la xidhiidha dembiilaha lagu tuhuma hawl danbi codsiga meel marinta sharciga dhabta ah. si looga hortaggo inay adiga ama cid kale ku keento halis caafimaad ama ammaanka jidh ahaaneed, waxaaanu shaaca ka qaadi karnaa macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga si sharciga loo meel mariyo. Waxa aanu shaaca uga qaadi karnaa macluumaad ku saabsan caafimaadkaaga shaqaale militari ama khabiiir ciidan xaalado gaar ah; qalabka sixida; barnaamijyada faa'idada dawladda ee ku saabsan qorista; ama sababo ah ammaanka qaranka, sida ilaalinta madaxweynaha. Waxa aanu u shaacin karnaa macluumaadka wakaaladda dheelitirka ee federaalka ama gobolka.

Hawlaha Kormeerka Caafimaadka: ADAMH waxa ay isticmaali kartaa ama shaaca ka qaadi kartaa macluumaad ku saabsan baadhitaanada caafimaadkaaga, baadhid, taageero, ama hawlo kale oo kawarhayn lana xidhiidha masuuliyaddeena sharci ee ku waajahan bixiyayaashayada adeegyada lagu heshiiyay. Waxa aanu isticmaali karnaa ama shaaca ka qaadi karnaa macluumaad ku saabsan daryeelka MH ee soo warinta ama baadhista ama dhacdooyinka aan caadiga ahayn.

Caafimaadka Dadweynaha: ADAMH waxa ay shaaca uga qaadi kartaa macluumaad ku saabsan caafimaadkaaga xaaladdaha halkaas oo gaboodfal, daayacaad, iyo dhibaatooyin guri ay jiraan.

Baadhe dhimasho: ADAMH waxa ay u fasixi kartaa macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga baadhe dhimasho.

Baadhitaan: ADAMH waxa ay u isticmaali kartaa ama u shaacin kartaa macluumaadkaaga AOD sababo baadhitaan haddii aanu raacno hagayaal la aasaasay. Si kastaba ha ahaatee, aqoonsigaaga laguma dari doono warbixin kasta. waa inaan helnaa ansixintaada si aan u fasaxno macluumaadka MH sababo baadhitaan ahaan.

ISTICMAALKA & SHAACINTA WAXA AY U BAAHAN YIHIIN ANSIXINTAAADA

ADAMH waxa ay isticmaali kartaa ama shaaca ka qaadi kartaa macluumaad adiga kugu saabsan oo kaliya haddii aad siiso oggolaanshiyo:

- Suuq gaynta
- libinta macluumaadka caafimaadkaaga la ilaaliyay (PHI)
- Isticmaalka iyo shaacinta badankoodua ee qoraalada falanqaynta
- Isticmaalo iyo shaacin kale oo aan lagu sharixin qoraalkan

Waad joojin kartaa oggolaanshiyahaaga wakhti kasta adiga oo na siinaya qoraal qoran.

ISTICMAALKA & SHAACINTA KUWAASI OO AAD DIIDI KARTO

Waxa aanu shaacin karnaa xaddi xaddidan ee macluumaadka caafimaadkaaga ee sitoosa ula xidhiidha daryeelkaaga, haddii aanu xili hore kuusoo sheegno oo aanad diidin:

- Qoysaska, saaxiibada, ama kuwa ku lugleh daryeelkaaga, kuna saabsan ku lug lahaanshiyahaaga daryeelkaaga ama bixinta daryeelkaaga;
- Waxa raaca rajooyinkii mar hore la sheegay, ama haddii ay tahay mid dag dag ah oo aanad siin karin fursad aad shaaca kaga qaado macluumaadka kahor inta aan daawo la siin;
- Qoysaska, saaxiibada, ama kuwan ku lugta leh, daryeelkaaga ku saabsan meelayntaada, xaalada guud, ama dhimashada.

XUQUUQAHAAGA TIXGALINAYA MACLUUMAAD KU SAABSAN CAAFIMAADKAAGA

Waxa aad leedahay xuquuqahan soo socda ee ku saabsan macluumaadka caafimaad ee aanu kugu ilaalinay adiga:

Inaad galaagal ku yelato aanad Nuqul qaadato: Waxa aad xaq u leedahay inaad aragto macluumaadka caafimaad ee aan kuu hayno. Badanaa tani waxa kujira diiwaanada biilka. Waa inaad ku samaysaa codsigaaga qaab qoraal, waxana laga soo jawaabi doonaa 30 cisho gudahood. Haddii aanu diidno galaangal lahaanshiyahaaga, diidmada waxa aanu ku soo sheegi doonaa qaab qorool ah. Badanaa tani waxa ay noqon doontaa inaad galaangal ku yeelato macluumaadka waxa laga yaabaa inay halis galiso noloshu ama ammaanka jidheed ee adiga ama shakhsi kale. Waxa lagu waydiin doonaa in diidmada dib loo eeggo. Haddii aad doonayso nuqulo ah macluumaadka caafimaadkaaga, waxa aad xaq u leedahay aad ku doorato qaybaha aad doonayso inaad nuqulkamid ah qaadato, iyo inaad macluumaad hore ka haysato qiimaha sawirrida.

Inaad codsato Xadad: Waxa aad xaq u leedahay inaad waydiisato inaad xaddidno sida aan u isitmaalno ama aan shaaca uga qaadno macluumaad ku saabsan caafimaadkaaga. Ma taageeri karno in la xaddido isticmaalka ama shaac ka qaadida kaasi oo uu sharcigu nooga baahan yahay. Na loogama baahna inaan taageerno codsigaaga xuduud ama xaddidaad. Heerka aanu taageernaa, qoraal ayaanu dhigi doonaa sharcigana waan u raaci doonaa, marka laga reebo xaaladaha gar-gaarka dag-daga ah.

Si aad Udoorato Sida Aan Kuula Soo Xidhiidhi Karno: Waxa aad xaq u leedahay inaad na weydiiso inaan macluumaadka kuugu soo dirno ciwaan kale, ama qaab kale. waa inaanu taageernaa codsigaaga, ilamaa inta ay noo fududahay inaan sidaa yeelnaa, ama haddii aad muujiso in ciwaanka kale uu u baahan yahay bad-baadada.

GUDDIGA ADAMH EE DEGMADA FRANKLIN OGEYSIISKA HABDHAQANKA ASTURNAANTA

Si aad u Oggaato wax ku saabsan Shaacinta: Waxa aad leedahay xaq aad kuhesho liis ahmarka, qofka, iyo sababta, iyo waxyaalaha kujira macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga kaasi oo loo fasaxay kuwa kale. Waxyaalaha reeban waxa kujira macluumaadka kaasi oo si caadi loogu isticmaalo daaweynta, bixinta, iyo hawlaha qorshayaasha caafimaadka; macluumaadka adiga lagu fasaxay ama kuwan lugta ku leh daryeelkaaga; macluumaad kasta oo la fasaxo iyadoo la raacayo oggolaashiyahaaga qoran; ama fasixida loo sameeyay ujeedooyin ah ammaanka qaranka ama meel marinta sharciga ama sixitaanada dhabta ah. Waxa aanu kaga jawaabi doonaa codsigaaga qoran ee liistadan 60 cisho gudahood. Codsigaaga waxa lala xidhiidhin karaa shaacinyo oo dib ugu noqonaya ilaa 6 sanno. Wax lacag ah maleh inta hore sannad kasta, laakiin waxa laga yaabaa inay jiraan lacag marka codsiyadu bataan.

Si aad U joosjiso Oggolaanshiyo: Haddii aad noo saxeexday oggolaanshiyo aan ku isticmaalno ama aan ku shaacino macluumaad ku saabsan caafimaadkaaga, waad diidi kartaa adiga oo nasoo ogaysiinaya.

In La Ogaysiiyo Marka La jabsado Qarsoodiga: Haddii PHI loo isticmaalay ama loosii daayay si aan haboonayn ama shil ah, waxa aad xaq u leedahay in lagu ogaysiiyo fasixidaa.

Si aad U codsato Wax ka baddelida Macluumaadkaaga: Haddii aad rumaysatay inay jiraan qalad ama macluumaad ka maqan diiwaanadayada, waxa aad codsan kartaa, qoraal, inaan saxno ama aan ku darno diiwaanka. Waxa aanu kujawaabi doonaa 60 cisho gudahood ee helida codsigaaga. Waanu diidi karnaa codsiga haddii aanu ogaano in macluumaadku:

- Uu sax yahay dhammaysna tiran yahay;
- Aanaan samayn anagu;
- Uuna qayb ka ahayn macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga kaasi oo aanu ilaalino; ama
- Aanu qayb ka ahayn macluumaadka caafimaadkaaga kaasi oo lagu oggolaan doono inaad baadho aanad nuqul kamid ah qaadata

Haddii aanu diidno codsigaaga ah inaan wax ka baddelno macluumaadka aanu ka hayno ee ku saabsan caafimaadkaaga, waxa aanu qoraal kuugu sheegi doonaa waxa ay sababuhu yihiin. Waxa aad xaq u leedahay codsigaaga, diidmadayada, ama odhaah kasta oo jawaab ah taasi oo aad ugu talagashay in lagu daro diiwaanadaada.

Haddii aanu ansixino codsiga wax ka baddelida, waanu baddeli doonaa macluumaadka waxa aanan kugu wargalin doonaa isbaddelka. Sidoo kale waxa aanu u sheegi doonaa kuwa kale ee u baahan inay ogaadaan isbaddelka macluumaadkaaga.

Fadlan soo gudbi codsigaaga ku saabsan macluumaadka caafimaadkaaga:

Sarkaalka Qarsoodiga
ADAMH Board
447 E. Broad St.
Columbus, OH 43215
614-224-1075

Si aad u Fayl garayso Cabasho: wax aar goosi ah kaa qaadi mayno adiga haddii aad samayso cabasho. Haddii aad rumaysatay inay xaquuqahaaga qarsoodiga ay ADAMH meel uga dhacday, waxa aad fayl garayn kartaa cabasho qoran.

With ADAMH
Sarkaalka Qarsoodiga
ADAMH Board
447 E. Broad St.
Columbus, OH 43215
Telefoonka: 614-224-1075

Xafiiska Xaquuqda Shicibka
Gobolka Region V Xafiiska Xaquuqda Shicibka
Waaxda U.S. ee Caafimaadka iyo Adeegyada Bini Aadamka
223 N. Michigan Ave. Suite 240
Chicago, IL 60601
Telefoonka: 312-866-2359
TDD: 312-353-5693
limayl: OCRComplaint@hhs.gov

XUQUUQDA INAAD NUQUL KA HESHO QORAALAN: Waxa aad xaq u leedahay inaad nuqul ka hesho qoraalkan wakhti kasta. Qoraalka sidoo kale waxa laga heli karaa websaytkayaga [www.adamhfranklin.org].

ISBADDELADA QORAALKAN: Waxa aanu ilaalinaa xaq lagu baddelo qarsoodigayaga ee lagu sharaxay qoraalkan, iyo in laga dhiggo isbaddelada inay ku haboonaadaan dhammaan macluumaadka caafimaad ee aanu ilaalino. Haddii aanu samayno, waxa aanu kuusoo diri doonaa nuqul ah qoraalka cusub ee dhammaan loo adeegayaashan wakhti xadirkayn soona dhig qarsoodiga cusub websaytkayaga [www.adamhfranklin.org]. Waxa aad codsan kartaa nuqul ah qoraalka cusub ee ka yimiday guddida ADAMH.

MACLUUMAAD BADAN: Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan sida aanu u qabaney macluumaadkaaga caafimaad ama qoraalkayaga qarsoodiga ah, fadlan kala soo xidhiidh Sarkaalka Qarsoodigayaga 614-224-1075.